



## Hagaha Qashinka iyo Dib wax u warshadeynta

Hagahan waxa uu bixiyaa macluumaad ku saabsan qashinka, dib u warshadaynta walxaha, dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah, qashinka deyrka, iyo adeegyada alaabta waaweyn ee lagu sameeyo Bloomington.

Wax badan ka ogoow adeegyada qashinka ee lagu maareeyo Bloomington, oo ay ku jiraan:

- Waxa la oggol yahay in dib u warshadayn lagu sameeyo
- Sida la iskaga diwaan galiyo gaadhi dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah
- Nadiifinta walxaha la soo dhigo dhinaceeda waxaa la soo qabtay xitaa sanado
- Qaadista bil kasta alaabta waaweyn ee dib loo isticmaali karo iyo kuwa dib loo warshadayn karo (sawirka kor ka muuqda)

Magaalada Bloomington

Biilasha Adeega Guriga: 952-563-8726  
[blm.mn/garbage](http://blm.mn/garbage)



# Tilmaamaha adeegga guud

## Diyaarinta weelashaada qashinka

- Alaabta waa in laga soo bixiyaa goobtaada wax ku uruuriso ugu dambayn 7 a.m. maalinta aad soo uruurinayso.
- Ka dhig weelasha qashinku inay isku jiraan ugu yaraan 3 fiid si aad u hubiso adeeg hufan oo badbaado leh.
- Weelasha qashinku waxaa la diyaarin karaa 12 saacadood ka hor maalinta la aruurinayo, waana in dib looga soo qaadaa wadada dhinaceeda 12 saacadood ka dib.
- Weelasha la dhigo dibadda waa in aanay ka badnayn 5 fiit gurigaaga hortiisa oo ugu yaraan 30 fiit u jiraan guryaha kale.

## Summada qofka wax lagu ogeysiinayo

Fadlan ka fiiri summada qofka wax lagu ogeysiinayo ee lagu dhejiyay gacanta weelkaaga qashinka. Tani waa macluumaadka muhiimka ah oo saameyn kara adeeggaaga.

## Fasaxyo

Haddii maalinta lagaa qaadayo qashinka ay tahay ama ay ku xigto maalin fasax weyn ah, qaadista waxa dib loo dhigi doonaa hal maalin. Fasaxyada waaweyn waxaa ka mid ah Maalinta Sannadka Cusub, Maalinta Xusuusta, Maalinta Xoriyada, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Thanksgiving, iyo Maalinta Kirismaska.

Ka fiiri jadwalka wixii ah fasaxyada saameeya qashin uruurinta sanadkan.

## Ilaalinta weelashaada qashinka

Fadlan weelkaaga qashinka nadiifi. Maamulka dawlada hoose iyo kuwa qashinka aruuriya ma nadiifiyaan weelasha qashinka. Si aad u nadiifiso weelkaaga qashinka, geli saxan saabuun yar ah iyo qamiiriso kuna buufi biyo. Ha marinin rinji ama ha beddelin qaybta kore ee weelkaaga qashinka. Weelka qashinka waxaa iska leh dadka qashinka kaa qaada. Haddii weelka qashinka uu waxyeelo gaarto una baahan tahay in wax laga beddelo, kala xiriir Waaxda Biilasha Guriga lambarka 952-563-8726.

## Nadiifinta Isnoowga iyo barafka

Isnoowga iyo barafku waa in meesha looga saaraa sida looga baahdo si weelka qashinku u ahaado mid dhulka la siman oo uu wax ka qaban karaan dadka qashinka qaado. Dadka qashinka qaado ma ururin doonaan qashinkaaga, kuma samayn doonaan dib-u-warshadayn, qashinka orgaaniga, ama midka dayrka haddii weelka qashinka aan la isticmaali karin

# Cida Lala xiriirayo

	Dawlada hoose	Dadka qashinka qaada	Ismamul
Bixi biilkaada, biloow adeega	X		
Soo sheeg markii laga tago in qashinka la qaado	X	X	
Beddelada weelka qashinka	X		
Ballan u samayso marka la qaadayo shay weyn	X		
Ballan u samayso in gadaal laga qaado weelka qashinka	X		
Ku balanso wicid taleefan qaadista qashiinta daarada	X		
Su'aalaha ku saabsan meesha la geeyo sheey kasta (dib u warshadaynta walxaha, qashinka, orgaanigada)	X	X	X
Qashinka halista ah iyo agabka kale ee u baahan in si gaar ah loo maareeyo			X
Daarad ku burburinta qashinka			X
Xujooyinka lagu gaarayo qashin la'aan			X
Agabyada dib u warshadaynta ganacsi			X
Agabyada abaartada dib u warshadeynta			X

## Biilasha Adeegyada Dawlada Hoose

952-563-8726

[utilitybilling@bloomingtonmn.gov](mailto:utilitybilling@bloomingtonmn.gov) | [blm.mn/garbage](http://blm.mn/garbage)

## Dadka qashinka qaada

Cidda kaa qaado qashinta wax uu yahay waxay ku xidhan tahay ciwaanka gurigaaga.

Haddi aadan hubin qofka kaa qaadayo qashinka yahay, waxa aad ka ogaan kartaa **blm.**

**mn/garbage** ama wac Qolada Adeegyada lambarka kor ku qoran.

**Waste Management**

**Republic Services**

**Aspen Waste**

952-890-1100

952-941-5174

612-884-8008

Khadka Taleefanka qashinka la seegay Jimcaha in la qaado saacadaha shaqada kadib

Haddii maalinta lagaa qaadayo qashinka ay tahay Jimcaha, oo aad u baahan tahay inaad soo sheegto qashin ururin la seegay wixii ka danbeeya 4:30 p.m. maalmaha Jimcaha, la xidhiidh 1-888-467-3471.

## Hennepin County

[environment@hennepin.us](mailto:environment@hennepin.us)

612-348-3777 | [hennepin.us/green-disposal-guide](http://hennepin.us/green-disposal-guide)

# Dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah

Waa maxay waxyaabaha orgaaniga ah ee dib loogu warshadeeyo wadada dhinaceeda?

In ka badan 1/3 qashinkeenu waa walxo orgaanig ah sida haraaga cuntada iyo warqado aan dib loo warshadayn karin oo si wanaagsan loogu isticmaali karo qurminta. Walxaha orgaaniga ah ee dib loo warshadeeyo ee la soo dhigo wadada dhinaceeda ayaa la soo qaadaa toddobaad kasta oo loogu beddelaa bacrimin goobta qurminta ganacsi.



## Isqor



Dhammaan qoysaska waxay bixiyaan kharaadka dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah. Waa inaad is-diiwaangelisaa si aad u hesho weelka lagu rido qashinka orgaaniga. Markaad iska qorto ka dib, weelka qashinka oo qaado 30 gaalloon ayaa la keenayaa isaga oo ay weheliyaan qalab soo dhawayneed oo ay ka buuxaan agabyo waxtar leh. Foojarka waxaa sidoo kale laguugu soo diri doonaa gurigaaga saddex bilood gudahood markaad iska diiwaan geliso sanduug bilaash ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u saxiixdo, booqo [blm.mn/organics](http://blm.mn/organics) ama ka wac Qolada Biilasha Adeega Guriga: 952-563-8726

# Dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah

Sidee bay u shaqeysaa shaqada dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah?

1.




Ku ururi walxaha orgaaniga ah bacaha la burburin karo inta la jooga gurigaaga oo dhan, oo ay ku jiraan jikada, musqusha iyo qolalka jiiifka. Bacaha la burburin karo waxaa ka mid ah bacaha balaastiga ah ee ay cadaysay BPI ama warqada cuntada dadka loogu xidho.

2.



Gali walxahaaga orgaaniga ah ee xiran weelkaaga dib loogu warshadeeyo. Baakadaha lagu rido Biizaha iyo kartoonnada ukunta looma baahna in bac lagu rido.

3.



Dhig weelkaaga qashinka orgaaniga guriga gadaashiisa ama dhamaadka wadada ee yaalo qashinkaaga iyo weelkaaga dib loogu warshadeeyo markay tahay 7 a.m. maalinta aad sida caadiga ah u leedahay in lagaa qaado.





# Liiska orgaaniga la aqbalali karo

## Muhiim: kaliya ku dar waxyaabaha saxda ah

Ku dar kaliya walxaha la aqbalay dib u warshadaynta walxahaaga orgaaniga ah. Ka hel liis faahfaahsan barta [blm.mn/detailed-organics-list](http://blm.mn/detailed-organics-list). Haddii aadan hubin in shay uu yahay mid la burburin karo, wac 952-563-4659 ama sheyga ku rid qashinka.

### Cunto kasta



### Baakaadaha cuntadu gaartay



Maya; Kartoonnada cuntada barafeysan, bacaha qaloonka, bacaha cuntada fudud lagu qaato, weelasha jalaatada, tiishka gacmaha ee kiimikada wax nadiifinta la mariyay

### Alaabta ciidu burburiso ee la caddeeyay



Ka raadi summada BPI-da alaabta la caddeeyay

Maya; Weelasha cuntada ee aan lahayn summada BPI-da, ka eeg websaydka BPI-da [bpeworld.org](http://bpeworld.org) si aad u xaqiijiso in sheygu yahay midka ciidu burburiso

### Alaabta kale ee ciidu burburiso



Maya; Qashinka daaradda, xafaayadaha ama suufka caadada, qashinka rabaayadaha iyo xoolaha, weelka ama gogosha rabaayadaha, suufka nadiifinta ama qallajinta ilmaha, calalka ama dufta ku harta dhar qallajiyaha, alaabta dib loo warshadayn karo (bokisyada, kartoonada)

## Talooyinka ku diyaarinta guriga

Walxaha orgaaniga ah waxaa lagu soo ururin karaa oona lagu kaydin karaa si kasta oo adiga ku habboon.

- **Weelasha:** Weelasha caadiga ah waxaa ka mid ah baaldiga jalaatada, gasaca kafeega, ama baaldiga lagu isticmaalo jikada.
- **Goobta kaydinta:** Dadka intooda badan waxay ku kaydiyaan walxaha orgaaniga ah miiska jikada, sinkiga hoostiisa, ama waxay galiyaan talaajada ama qaboojiyaha.
- **Boorsooyinka:** Hubi inaad boorso ku rido walxahaaga orgaaniga. Waxaad isticmaali kartaa boorsooyinka ka samaysan baakadaha, bacaha la burburin karo, ama baaldiyada aan leemanka qabin oo aad ku riddo bac ka hor inta aadan keenin weelkaaga qashinka.



## Talooyinka qashin uruurinta

- **Isticmaal weel dabool duleelo leh** si aad u yareyso burburka qashinka cuntada. Tani waxay yareyn doontaa urta iyo cayayaanka.
- **Dareeraha** waxay jebiyaan bacaha la burburin karo. Daadi dareeraha xad-dhaafka ah si ay uga caawiyaan bacahaagu in ay waqti dheer sii jiraan.
- **U diyaari** weelkaaga qashinka in la qaado toddobaad kasta, si aad uga hortagto urta iyo cayayaanka.



## Wax badan ka ogow

Ma hubtaa sida loo bilaabo walxaha orgaaniga ah? Ka booqo websaydkeena **blm.mn/organics** si aad u hesho talooyin dheeraad ah oo kaa caawinaya inaad bilowdo.

## Maxay tahay sababta aan uga qaybqaadanayo dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah?

Qof kastaa wuxuu leeyahay sabab u gaar ah oo uu isaga diiwaangeliyo dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah. Dhowr sababood oo caadi ah:

- **Waxay u fican tahay deegaanka.** Burburintu waxay ku soo celisaa nafaqooyinka ciidda waxayna caawisaa inay koraan dhir caafimaad leh.
- **Waxay yareysaa qashinka waxayna qofka u badbaadisaa lacagta.** Maaddaama in badan oo ka mid ah qashinkeena ay ku jiraan agabka loo ogol yahay dib-u-warshadaynta walxaha orgaaniga ah, waxa laga yaabaa inaad awoodo inaad yarayso cabbirka weelkaaga qashinka oo aad lacag kaydsato.
- **Way fududahay.** Marka aad hesho qalabka ku shaqaynaya, dib u warshadaynta waxaha orgaaniga ah waxay noqonaysaa qayb sahlan oo ka mid ah jadwalkaaga.



Sidee bay dib u warshadaynta walxaha orgaaniga ah ee la dhigo wadada

dhinaceeda uga duwan tahay qashinka lagu burburiyo daarada?



**Dib-u-warshadaynta walxaha orgaaniga ah** waa hab ku habboon oo lagu burburiyo dhammaan qashinkaaga cuntada ah adiga dayactiraynin weelka qashinka lagu burburiyo ee daarada kuu yaalo. Walxaha orgaaniga ah ee laga soo ururiyo Bloomington waxaa la geeyaa ganacsi oo ballaaran oo lagu burburiyo qashinka. Hanaanka burburinta qashinka ee ganacsi waxa uu dila bakteeriyada waxyeelada leh wuxuuna burburiyaa walxaha aan ku burburin goobtaqashinka daarada, sida waxyaabaha caanaha laga sameeyo, hilibka, lafaha, waraaqaha la isku tirtiro iyo istiraashada, bokisyada Biizaha ee dufanka leh, iyo waxyaabaha ay aqoonsan tahay BPI.



**Qashink ku burburinta daarada** ayaa weli ah hab

wanaagsan oo lagu burburinayo qashinka miraha iyo khudaarta iyo qashinka daarada oo lagu beddelo ciidda qani ah oo aad ku isticmaali karto guriga.



# Diyaarinta dib u warshadeyntaada qashinkaaga

Walxaha dib loo warshadeeyo waxaa la qaadaa toddobaad kasta



**Lama oggolo bacaha balaastikada ah**

- Waxyaabaha dib loo warshadayn karo waa inay dabacsan yihiin. Lama oggolo bacaha balaastikada ah.
- Furarkooda ha saarnaadaan dhalooyinka balaastiga iyo jeegaga.
- Ha lahaadaan gasacadaha, kartoonaada iyo dhalooyinka muuqaalkood 3D ee asalka ahaa.
- Kala fidi Kartoonnada.

## Dib u warshadayn dheeraad ah

Ku rid walxa kale ee dib loo warshadeynayo baakad ka dibna ag dhig weelkaaga walxaha lagu warshadeeyo. Hubi in bacaha iyo sanduuqyada dheeraadka ahi aanay miisaankoodu ka badnayn 40 rodol. Haddii aad si joogto ah u haysatid walxo dheeraad ah oo dib u warshadeyn u baahan, waxaad codsan kartaa weel weyn ama weel dheeraad ah adiga oo wacaya qofka kaa qaada qashinka. Ma jiraan wax kharash ah oo ku baxayso diyaarsashada walxo dheeraad ah oo dib loo warshadeeyo ama helitaanka weelka walxaha dib loogu warshadeeyo oo dheeraad ah.

# Liiska aqbalada dib u warshadaynta

Warqad, sanduuqyo, kartoono,  
Baakado fidsan



Maya; Istiraashooyinka, tiishka gacmaha, warqadaha jarjaran, saxamaha warqada ka sameysan, weelasha jalaatada, koobabka kafeega

Dhalooyin caag ah, jeegaga caaga,  
koobabka, weelasha

Dib-u-warshadee caagadaha # 1, 2, 5  
Daboolada ku dhaaf



Maya; Bacaha ama xaashiyaha balaastiga ah, baqshadaha wax lagu qaado, #6 balaastig, Styrofoam™, weelasha lagu keeno walxaha halista ah

Dhalooyinka dhalada ah iyo darmuuska



Maya; Dhalooyinka cabitaanka, pyrex, ubada, muraayadaha

Gasacadaha birta ah



Maya; Daasadaha rinjiga, dhululubada propane, taangiyada helium-ka, weelasha ay ku jiraan walxaha halista ah

Kartoonada  
Ha fidinin



Maya; Warqad ama kartoonnada ukunta ee Styrofoam™, tuubooyinka jalaatada

**Tilmaamaha diyaarinta**

- Xoogaa biyo ka raaci alaabta ka hor inta aanad dib u warshadayn.
- Ku rid alaabta dabacsan gaarigaaga dib u warshadaynta.
- Ha burburin gasacadaha, dhalooyinka balaastiga ah ama kartoonnada. Kala fidi Kartoonnada.
- Furarkooda ha saarnaadaan dhalooyinka balaastiga ah, jeegaga, iyo weelasha.

# Si cajiib ah dib wax ugu warshadee: Ka tag kuwan

Xarumaha sameeya dib u warshadaynta waxa kaliya oo loogu talagalay in lagu kala saaro shayada ku jira hagaha dib u warshadaynta. Mashiinada yaala xarunta dib u warshadaynta waxay u kala soocaan sheeyada muuqaal ahaan, miisaan ahaan, iyo cabbirkooda. Walxaha ka yar 3 inji, kuwa ka weyn baaldi 3-gaalloon ah, ama kuwa si xun u muuqaal eg ama miisaankoodu waxa ay dhaawici karaan shaqaalaha qaadaya iyo kuwa dib u warshadayntayo ama waxay dhaawacaan qalabka xarunta dib u warshadaynta.

## Alaabtan ka ilaali gaadhigaaga dib u warshadaynta

Waxyaabaha soo socda dib looma warshadayn karo oo kaliya waxay wasakh ku daraan nidaamka dib u warshadaynta walxaha.



Bacaha balaastikada ah iyo duubaha



Dib u warshadaynta baagaa



Alaabaha waaweyn ee caaga ah iyo boombalooyinka



Eleكتروoniga iyo baytariyada



Walxaha birta ah ee aan kala sooca lahayn



Warqadaha la jarjaray



Saxamada warqada ka sanaysan, koobabka, istiraashooyinka, dhuumaha, iyo maacuunta



Tanglers sida xadhkaha korontada, nalalka fasaxa, iyo tuubooyinka



Dhululubada la cadaadiyo (propane, helium, CO2)

U qaad ikhtiyaarada loo heli karo in dib loogu warshadeeyo qaar ka mid ah alaabtan. Ka fiiri Hennepin County Green Disposal Guide [hennepin.us/green-disposal-guide](https://hennepin.us/green-disposal-guide)

# Su'aalaha Inta badan la iska weydiyo dib wax u warshadeynta

Waa maxay macnaha tirooyinka ku qoran walxaha balaastikada ah?

Lambarka ku qoran shey balaastig ah, oo badanaa ku dhex jira calaamada dib u warshadaynta, waxaa loo yaqaan koodka aqoonsiga balaastiga.

Koodhka aqoonsiga balaastiga wuxuu u sheegaa qolada walxaha dib u warshadeeyo nooca balaastiga ah ee shay ka samaysan yahay. Kama dhigna in sheyga dib loo warshadeyn karo.

Waxaa jira todoba nooc oo balaastiig ah, oo lagu calaamadeeyay koodka aqoonsiga balaastiga 1 ilaa iyo 7. Gudaha Bloomington, balaastigyada #1, #2, iyo #5 waa laga oggol yahay in dib loo warshadeeyo.

Waxaa jira suuqyo xooggan oo dib loogu warshadayn karo balaastiiggaas waxaana laga sameeyaa waxyaabo cusub.

Halkan waxaa ku qoran hab fudud oo lagu xasuusto: Gacanta kor u taag ka dibna laab farta dhexe iyo farta faaraantiga si aad u sameeyso calaamada "waan ku jeclahayn" ee Luqadda Dhagoolaha ee Ameerikaanka.

Ka soo tiri suulkaaga, farahaaga #1 (suulka), #2 (murugsatada), iyo #5 (far dhexaadka) waa inay taagnaadaan. Kuwani waa balaastiikyo dib loo warshadayn karo.



## Malaga qaadi daboolka mise way saar naanayaan?

Daboolada nugul dib looma warshadeyn doono. Waxay ku dhici doonaan qalabka kala-soocidda waxayna ku dambayn doonaan muraayadda la jajabiyey. Dhaqamada ugu fican waa:

- 1. Furarkooda ha saarnaadaan dhalooyinka balaastiga ah.** In kasta oo laga yaabo inay yihiin laba nooc oo balaastig ah, haddana aakhirka waa la kala sooci doonaa oo labadaba dib ayaa loo warshadayn doonaa.



- 2. Ku rid daboolada birta ah ee yaryar qashinka.** Haddii aad rabto inaad sameeyso dadaal dheeri ah si dib loogu warshadeeyo, waxaad ku ridi kartaa dhowr dabool oo bir ah oo yar yar, daboolada birta ee magnadka leh (ka yar 3 inji oo dhexroor ah) weelka sabuunta oo bir ah kana qalooci qaybta kore si aysan uga soo dhicin. Ku rid gasaca saabuunta weelkaaga dib u warshadaynta walxaha.



# Uruurinta qashinka

## Qashinka waxaa la ururiyaa toddobaad kasta

- Xirxir qashinkaaga. Laba baakad gali dambaska qabow, boodhka, qashinka xayawaanada rabaayada, iyo balka.
- Qashinku waa inuu ku jiraa weelkaaga qashinka oo daboolkuna xiran yahay. Bac kasta oo aan la ekayn weelkaaga qashinka waxaa lagugu xisaabin doonaa sida qashin buuxdhaafay.
- Haddii weelka qashinka ee banaan la soo dhigo in la qaado uu si joogto ah u buuxdhaafo, tixgeli inaad hesho weel qashin oo weyn ama inaad ku soo darsato weel qashin oo dheeraad ah.
- Waxyaabaha hoos lagu muujiyey waa tusaalayaal shay ay tahay in lagu rido qashinkaaga, oo aan dib loo warshadayn ama la burbirin karin.

Warqad aan dib loo warshadayn karin, balaastig, iyo balaastig lagu wareejiyay warqad



Bacaha balaastiga ah iyo waxyaabaha wax lagu duubo



Walxaha wax lagu duubo



Alaabooyin waara



Dhalooyinka iyo dhoobabka aan dib loo warshadayn karin



Alaabooyinka daryeelka ee shakhsiga, xafaayadaha, saxarada xayawaanada rabaayada



**Maya; Taayirada, dareerayaasha, qashinka khatarta ah**



# Maareynta alaabaha waaweyn

Kharash sanadle ah ayaa laga qaadaa dhammaan qoysaska ku jira barnaamijka qashinka iyo dib u warshadaynta dawlada hoose ee adeegyada ururinta alaabta waaweyn. Kharashka waxaa loogu yeeraa “Khidmada Maareynta Alaabaha waaweyn” marka lagu qorayo Biilasha Adeega Guriga. Biilasha Adeegaada Guriga waxay ka tarjumaysaa adeega laba bilood.

Lacagtani waxay maalgelisaa hawlaha hoos ku qoran. Ujeedada hawlahani waa in dib loo isticmaalo oo dib loo warshadeeyo si loo yareeyo qashinka.

## Soo uruurinta bil kasta alaabta waaweyn ee dib loo isticmaali karo iyo kuwa dib loo warshadayn karo

Inta lagu jiro usbuuca ugu horreeya ee dhan ee bil kasta, qaar ka mid ah walxaha dib loo isticmaali karo iyo kuwa dib loo warshadayn karo ayaa loo oggolaadaa in laga soo qaado wadada dhinaceeda. Kharashka maarynta alaabaha waaweyn waxay daboolaan adeegan iyada oo aan wax kharash ah oo qaadis ah aan lagaa qaadin. Soo-qaadista waa in si toos ah wakhti hore loogu sii qorsheeyaa qofka dawlada hoose ay heshiiska kula jirto, Better Futures.



Si aad wax badan uga ogaato, booqo [blm.mn/bulkies](https://blm.mn/bulkies)

Ku qorsheyso taleefanka lambarka 612-353-5400 (Isniin ilaa iyo Jimcaha, 8 a.m. - 5 p.m.), ama onlaynka barta [betterfuturesminnesota.com/curbside-collections](https://betterfuturesminnesota.com/curbside-collections)

## Qaadida walxaha la soo dhigo wadada dhinaceeda sanad walba

Qaadida Qashinka la dhigo wadada dhinaceeda waxaa la qabtaa sannad kasta sannadaha dhabanka ah oo kaliya.

Inta lagu jiro qaadida qashinka wadada dhinaceeda la dhigo, dadka deegaanka waxay dhigi karaan xaddi xaddidan oo ah alaabaha waaweyn iyo qashinka daarada si loo qaado Sabtida loo qoondeeyey.



Si aad wax badan uga ogaato, booqo [blm.mn/curbside](https://blm.mn/curbside)

Cleanu Qaadida Qashinka la dhigo wadada dhinaceed

Sanadha dhabanka ah ee ku dhamaanaya 0, 2, 4, 6, ama 8 sida 2026, 2028, iwm..

Lagama qaadayo Qashinka la dhigo wadada dhinaceed

Sanadha kisiga ah ee ku dhamaanaya 1, 3, 5, 7, ama 9 sida 2025, 2027, iwm.

# Maareynta alaabaha waaweyn

Dhacdada sanadlaha ah ee keenista sheeyada dib-loo warshadayn karo

Keenista sannadlaha ah qashinka dib loo warshadayn karo ayaa bilaabmaya 2022, waxaana hadda la bixiyaa dayr kasta. Alaabooyinka la aqbalay waxaa ka mid ah qalabka elektarooniga ah, qalabyada korontada ku shaqeeya, biraha qashinka ah, joodariyaasha, baaskiilada, iyo waraaqaha goobta lagu jeexjeexay. Alaabooyinka qaarkood waxaa lagu ogolaadaa lacag la'aan, qaarna waxaa lagu aqbalaa laca



Si aad wax badan uga ogaato, booqo [blm.mn/drop-off](https://blm.mn/drop-off)

Ku beddelo dhacdooyinka kuwo dib loo isticmaali karo

Magaaladu waxay bilaabeen abaabulka dhacdooyinka alaabaha la kala beddesho 2022 iyada oo leh beer lagu kala beddesho qalabka. Magaalada ayaa sidoo kale qabatay dhowr isdhaafsi oo dhowr ah oo ay ku jiraan is-dhaafsiyo iyo qorshayaal ay ku abaabulaan dhacdooyin badan oo isku-dhafan mustaqbalka. Dhacdooyinkaasi waa kuwo bilaash oo u furan dhammaan dadka deggan Bloomington.



Si aad wax badan uga ogaato, booqo [blm.mn/swaps](https://blm.mn/swaps)

Wicista soo qaadis shay culus ah ayaa la heli karaa sanadka oo dhan

Ka soo qaadida alaabta waaweyn ee la dhigo wadada dhinaceeda, qalabka ku shaqeeya korantada, iyo qashinka elektiroonigga ah ayaa la heli karaa sanadka oo dhan iyada oo loo marayo qofla qaada qashinka iyadoo la soo wacayo. Si aad u ballansato soo qaadis oo aad u hesho qiimo-sheeg ku salaysan alaabta la soo qaadayo, ka wac Qolada Adeega 952-563-8726

Si aad wax badan uga ogaato, booqo [blm.mn/garbage](https://blm.mn/garbage)

# Qashinka daaradda

## Qashinka daarada waxaa la qaadaa toddobaad kasta, Abriil ilaa iyo Nofeembar

Qashinka daarada waa adeeg is-diiwaangelin oo la ururiyo hal xilli, laga bilaabo Isniinta toddobaadka labaad oo dhan ee Abriil oo dhammaanaya Jimcaha toddobaadka Nofeembar oo dhan. Haddii baraf weyni dhaco ka hor dhammaadka Nofeembar, ururinta qashinka daarada ayaa laga yaabaa inay dhammaanayso wakhtigaas.



## Tilmaamaha qashin uruurinta

- Waa sharci darro in qashinka daarada lagu rido weelka qashinka gudaha Minnesota, qashinka daaradana lagama oggolo weelka lagu rido qashinka orgaanigada ah.
- Weelkaaga qashinka daarada waxaa lagu ridi karaa weelka qof qashinka qaado uu kuu keenay, bacaha warqadda buniga ah ee Kraft, bacaha qashinka daarada ee ay xaqiijisay BPI in la burburin karo, ama qashinka yaryar ee duub ahaan la iskugu xiray.
- Bac kasta, weel kasta, ama xidhmo kasta waa in ay leedahay miisaan ka yar tahay 40 rodol.
- Dadka qashinka qaada waxay ururin doonaan ugu badnaan 20 jawaan oo qashinka daarada ah todobaadkii.

La aqbalay	Lama oggola
<ul style="list-style-type: none"><li>• Lamaha iyo caleenta <b>ka yar</b> 3 inji dhexroor ah iyo 3 fuud oo dherer ah</li><li>• Cawska la jaray</li><li>• Caleemaha</li><li>• Wasqda saaran gunta geedka</li></ul>	<ul style="list-style-type: none"><li>• Laamaha iyio caleenta ka badan 3 inji oo dhexroor ah ama 3 fuud oo dheer ah</li><li>• Wasakh, ciid, ama cawska</li><li>• Balka</li><li>• Wasaqda xayawaanada rabaayada</li></ul>

## Adeegyada rukumashada iyo kuwa qofka loo wacdo

Qashinka daarada waa adeeg aad ka rukumanaysi barnaamijka qashinka iyo dib-u-warshadaynta. Adeegga rukumashada waxa ku jira hal weelka qashinka daarada ah. Macaamiisha waxa laga yaabaa inay codsadaan weel qashin oo kale waxaana laga qaadi doonaa kharash dheeri ah.

Dadka deegaanka ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ku bixiyaan boorso kasta oo qashinka daarada ah adeegyada qofka loo wacdo. Istiikarada qashinka qofka loo wacanayo waxaa laga iibsaa karaa adigoo wacaya 952-563-8757. Deganayaashu waa inay ku dhejiyaan hal stiikar bac kasta oo qashinka daarada ah oo qof loogu waco inuu qaado. Si aad u ballansato qashin qaadaha la wacdo, kala xidhiidh Qolada Biilasha Adeega 952-563-8726 ugu yaraan 48 saacadood ka hor maalinta la qaadayo.

# Qashinka khatarta ah iyo walxaha dhibka leh

## Goobaha qashinka la geeyo ee Hennepin County

Hennepin County waxay leedahay laba xarumood oo la keeno qashinka oo aqbasha qashinka khatarta ah iyo agabka dhibka badan sanadka oo dhan.

Xarumaha la geeyo qashinka waxay ku yaalaan

- **Bloomington: 1400 W 96th Street, Bloomington, 55431**
- **Brooklyn Park: 8100 Jefferson Highway, Brooklyn Park, 55445**

Wax badan ka ogoow barta [hennepin.us/drop-offs](http://hennepin.us/drop-offs)

### Waxyaabaha la ogol yahay waxaa ku jira:

- Dareeraha baabuurta
- Batariyada
- Xadhkaha iyo nalalka xadhigga ah
- Warbaahinta elegtarooniga ah
- Waxyaabaha lagu nadiifiyo guriga iyo dareerayaasha
- Kimikooyinka cawska iyo beerta oo ay ku jiraan sunta haramaha iyo sunta cayayaanka
- Alaabaha ay ku jiraan meerkurida sida nalalka iftiinka, heerkulbeegyada, iyo heerkulbeega walxaha qufulan
- Bacaha balaastiga ah iyo waxyaabaha wax lagu duubo



### Qaabab intaas ka badan oo loo keeni karo qashinka

- **Ha-Isu imaatinka uruurinta qashinka khatarta leh:** Isu imaatinka qashin aruurinta waxay sahleysaa in dadku helaan goobo deegaanka ah oo qashinka khatarta leh lagu qubo. Dhowr munaasabadood ayaa lagu qabtaa Minneapolis sanad walba. Ka hel jadwal iyo liiska agabyada la aqballo barta [hennepin.us/collectionevents](http://hennepin.us/collectionevents)
- **Sanduuqa lagu rido daawooyinka:** Daawooyinka aan la rabin iyo kuwa aan la isticmaalin waxaa si badbaado leh loogu tuuri karaa sanduuqyada lagu rido. Ka raadi goobaha ay yaalaan barta [hennepin.us/medicine](http://hennepin.us/medicine)
- **Green Disposal Guide:** Ma hubtid miyaa sida si fiican loogu asturo alaabaha? Ka hel dookhyada dib u warshadaynta, dib-u-isticmaalka iyo asturida qashinka barta [hennepin.us/greendisposalguide](http://hennepin.us/greendisposalguide)



# Yaree dibna u isticmaal

Inaan la abuurin qashin marka hore iyo kordhinta noloshu alaabta aad haysato ayaa xitaa ka muhiimsan dib u warshadaynta. Waxa aad ku yeelan kartaa saamayn intaas ka sii weyn markaad la shaqeyso qoyskaaga, saaxiibadaada, deriskaaga, iyo kuwa aad shaqa wadaaga aad tihiin si aad isbeddel ugu samayso guriga, shaqada, iyo bulshadaada dhexdeeda.

Hennepin County waxay bixisaa barnaamijyo iyo ilo badan oo gacan ka gaysanaya:

## Fix-It Clinics

Ka hel caawimo bilaasha ah oo lagu hagaajinayo alaabta guriga ee kaa jabtay: [hennepin.us/fixitclinic](http://hennepin.us/fixitclinic)

## Dib u isticmaal sidoo kalena dib u warshadee agabyada dhismaha

Yaree saamaynta mashruucaaga hagaajinta guriga ee soo socda. Wax ka ogoow deeqaha iyo agabyada la heli karo: [hennepin.us/salvage](http://hennepin.us/salvage)

## Community Recycling Ambassadors

Ka hel tababar ku saabsan nidaamka qashinka ka dibna si tabaruc ah u baro dadweynaha iyo dhamaystirka dhimista qashinka iyo mashaariicda dib u warshadaynta walxaha barta: [hennepin.us/recycling-ambassadors](http://hennepin.us/recycling-ambassadors)

## Dib u warshadaynta alaabaha iyo dhimista qashinka ee ganacsi

Ku dhiiri geli goobta aad ka shaqeyso iyo ganacsiyada aad jeceshahay inay yareeyaan qashinka oo ay hagaajiyaan dib u warshadaynta alaabaha. Deeqaha, calaamadaha, iyo caawimo farsamo ayaa diyaar ah: [hennepin.us/businessrecycling](http://hennepin.us/businessrecycling)

## Yaraynta qashinka dugsiga iyo dib u warshadaynta alaabaha

Yaree qashinka oo wax bar jilka soo socda. Deeqaha iyo caawimo farsamo ayaa diyaar ah: [hennepin.us/schoolrecycling](http://hennepin.us/schoolrecycling)





# Yaree dibna u isticmaal

## Dooro dib u isticmaalka

Ka ogoow talooyinka aad ku noqonayso macaamiil fakar leh iyo agabyada soo iibsiga waxyaabaha celiska ah, shey soo amaahashada, ama wax kala beddelashada barta: [hennepin.us/choose-to-reuse](https://hennepin.us/choose-to-reuse)

## Xujooyinka Lagu gaarayo Qashin La'aan

Ka hel tababbar gaar ah oo hel agabyada, aqoon-is-weydaarsiyada, iyo saadadka barta: [hennepin.us/zerowastechallenge](https://hennepin.us/zerowastechallenge)

## Xujada aan la isticmaalaynin wax Balaastiga ah

Wax ka ogoow balaastikada oo samee ficilada gacan ka geysanaya in aduunka laga ciribtiro balaastiga barta: [hennepinplasticfree.ecochallenge.org](https://hennepinplasticfree.ecochallenge.org)

## Xujada Joojinta Wasaqda Cuntada

Samee ficilo fudud oo wax ku ool ah oo kaa caawin doona inaad joojiso wasaqda cuntada oo aad lacag badan geliso jeebkaaga: [hennepinfoodwaste.ecochallenge.org](https://hennepinfoodwaste.ecochallenge.org)





**Magaalada Bloomington**

1800 West Old Shakopee Road  
Bloomington, MN 55431



Iska qor Wariidaha Elektarooniga ah barta  
[blm.mn/e-subscribe](mailto:blm.mn/e-subscribe) si aad u hesho akhbaaraadka  
lagu soo diro iimaylka ee ku saabsan barnaamijka  
qashinka iyo dib wax u warrashadeynta.



Receive this information in  
other languages

Reciba esta información en español

Ku hel macluumaadkan Af Somali

Nhận thông tin này bằng Tiếng Việt